




# Habka Howlgelinta Kiraystaha Xirmada Xogta



Positive tenant experience



Si aad ugu codsato dokumentigan qaab la heli karo ama iyadoo turjuman,  
fadlan la xiriir [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca) ama wac **416-981-5500**.



# Shaxda Xirmada



Horudhac	3
Maxay ansixiyeen Guddoonka Maamulayaasha?	4
Taariikh	5
Howlihii kiraystaha	6
Ikhtiyaarada Habka Howlgelinta Kiraystaha	7
Siduu u shaqeeyaa Habka Howlgelinta Kiraystaha?	8
Heer dhisme ama Townhouse	8
Heer Beel ama Unug Howlfulin	9
Heer Magaalo	10
Maxaa soo socda	10
Waxa aad u baahan tahay in aad ka ogaato ikhtiyaarada howlgelinta degaanka	11
Dulmarka habraaca doorashooyinka	15
S&J ah doorashada ikhtiyaarkaaga howlgelinta degaanka	16
Ku-howlanooow	17
Qofka lala xiriirayo	18

**Wax-ka-qabashada muhimadaha kiraystaha  
si loo dhiso beelo nolol leh**



## **Kiraystayaasha iyo shaqaalaha Hab Howlgelin Kirayste oo cusub ayeey ka sameeyeen Toronto Community Housing**

Sannadihii yaraa ee ugu dambeeyey, kiraystayaasha iyo shaqaalaha waxay ka wada shaqeeyeen ikhtiyaar howlgelin oo dhiirigelinaya awoodna siinaya kiraystayaal badan in aay ku howlanaadaan beeshooda.

Hadafka waa in la sameeyo Hab Howlgelin Kirayste oo laga wada-tirsan-yahay, la-heli-karo, daahfuran kuna saleysan muhimado kiraystayaasha tilmaameen.

Habka la soo jeediyey iyo qorshaha hirgelinta waxaa ansixiyey Guddiga Adeegyada Kiraystaha May 2019 iyo Guddoonka Maamulayaasha July 2019.

Waxaan rajeyneynaa markaad aqriso xirmadan xogta ah, in aay kugu dhalato in aad ku howlanaato beeshaada fahamtidna sida saxda ah ee loogu howlanaanayo.

**Beeshaada, codkaaga!**





# Maxay ansixiyeen Guddoonka Maamulayaasha?

Guddoonka Maamulayaasha Toronto Community Housing waxay ansixiyeen Habka Howlgelinta Kiraystaha la-cusbooneysiyyey iyo qorshaha hirgelinta July 19, 2019.

## **Qeybaha ugu muhimsan ee Habka Howlgelinta Kiraystaha waxaa ku jira:**

1. qaab-dhismeed ka kooban saddex  
heer: heer dhisme/ama townhouse,  
heer Beeleed ama OU iyo heer  
Magaalo.
2. in kiraystayaasha la siiyo fursad aay  
ku go'aamiyaan haddii aay doonayaan  
in aay ka-qeybgalaan Habka  
Howlgelinta Kiraystaha ee la-  
cusbooneysiyyey.
3. in la siiyo kiraystayaasha fursad aay  
ugu codeeyaan mid ka mid ah afarta  
ikhtiyaar ee sida ugu fiican ugu jaan-  
go'an beeshooda heer dhisme ama  
townhouse.
4. in loo ogolaado kiraystayaasha in aay sameystaan xiriyo  
kirayste iyadoo aay intaa u dheer tahay ka howlgelidda Habka  
Howlgelinta Kiraystaha.
5. in la faro Toronto Community Housing in aay:
  - Hindisaan habraac codeyn si aay kiraystayaasha u  
xushaan ikhtiyaarka aay doorbidayaan ee habka  
howlgelinta degaanka
  - sameeyaan oo lagu dhaqaaqo istaraatiijiyad isgaarsiineed oo  
la socodsiineysa kiraystayaasha ikhtiyaarada kala duwan ee  
howlgelinta degaanka iyo habraaca xulashada
  - sameeyaan Miisaska Waxqabadka Beesha Kiraystaha (hore  
loogu yaqaanay Golayaasha Kiraystaha) iyo Guddi Kirayste-  
shaqaale ee La-socoshada Xukunka ee Magaalada oo dhan ah



- in la sii wado in la fuliyo 52-da talo ee ka yimi Guddiga Talo-bixinta Howlgelinta ee Kirayste-Shaqaale ee Magaalada oo dhan
- in dib loo eego doorarka iyo waajibaadyada iyo hagayaasha xeerka anshaxa wakiilada beesha ee la doortay ama la xulay iyo in lagu hagaajiyo waqtiga la qabanayo arrimaha bartilmaameedka ah



## Sababta loo howlgelinayo kiraystaha?

Kiraystayaasha ayaa sida ugu fiican u fahamsan baahiyada iyo hantida beeshooda. U soo bandhigidda kiraystayaasha fursado siinaya in aay ku howlanaadaan howlaha lagu hagaajinayo tayada noloshooda waxay u ogolaaneysaa Toronto Community Housing in aay hagaajiso gudbinta adeegga aayna sameeyaan waayoaragnimo kiraystaha diiradda saareysa.

Si loo hubiyo in codadka kiraystayaasha la maqlo, TCHC waxaa ka go'an in aay sameeyso habraac howlgelin kirayste oo xoog leh shaqeynayana iyo fursado aay u siman yihiin dhamaan kiraystayaasha.

## Waa maxay Habka Howlgelinta Kiraystaha?

Habka Howlgelinta Kiraystaha waa hab rasmi ah oo lagu howlgelinayo kiraystayaasha ku nool Toronto Community Housing. Howlgelinta kiraystaha cusub waxay ku bilaabatay hadaf ah in la xoojiyo habka howlgelinta kiraystaha jira si loo kordhiyo ka-qeybgalka kiraystayaasha go'aan-gaaridda degaanka.

## Sidee baan halkan ku soo gaarnay?

- **2015:** Warbixinta kama dambeysta ah ee duqa magaalada iyo Wajiga I ee Qorshaha Hirgelinta Kiraystaha waxay ku taliyeen in Toronto Community Housing (TCHC) aay xoojiso habka howlgelinta waqtiga xaadirka ah.
- **2016:** Koox kiraystayaal ah ayaa sameeyey, hirgeliyey oo ku sameeyey ablabaleyn natijjooyinkii ka yimi xog-ururinta “Take 5”, kuwaasoo si toos u bixiyey talooyin ku hareereysan Habka Howlgelinta Kiraystaha ee aay sameeyeen Guddiga La-talinta Howlgelinta oo Magaalada oo dhan ah ee Kirayste-Shaqaale (CWTSEAC).
- **2017:** CWTSEAC waxay u soo bandhigeen 52 talo Guddiga Adeegyada Kiraystaha. Talooyinkan waxay diiradda saareen xukunka, la-xisaabtanka, macluumaadka dhismaha,

isgaarsiinta, ka-qeybgalka kiraystaha iyo kobcinta awoodda.

- **2018:** Toronto Community Housing waxay go'aansatay qaadashada iyo fulinta talooyinka CWTSEAC.




# Ku-howlanaanta Kiraystaha

Iyadoo la marayo habraac wada-tashi, TCHC waxay kala shaqeysay kiraystayaasha in la tilmaamo muhimadahooda degaanka. Kiraystayaasha waxay noo sheegeen in aay doonayaan hab la-cusbooneysiyyey oo kordhinaya:

- Ka-qeybgal kirayste ee go'aan-gaaridda degaanka
- Awoodda kiraystayaasha ee – waxay doonto ahaato da'da, jinsiga, jinsiyiga, diinta ama awoodda(jir/maskax) – aay beeshooda uga howlgalayaan si macno leh oo u furan dadka oo dhan

## 2018 qodobada muhiim ah



### 3,326 kirayste

Ayaa ka qeybgalay shirarka dhisme iyo townhouse si aay isugu daraan fikradaha muhimadaha degaanka



### 10,205 kirayste

Ayaa u ku codeeyey habraaca,  
Dot-mocracy si aay u muhimdaha beesha u kala-saaraan



### 2,380 kirayste

Ayaa buuxiyey xog-ururin waayoaragnimada kiraystaha



### 125 kirayste

Ayaa ka qeybgalay Wadatashiyada Kiraystaha Mutadawaca ah



### 303 kirayste

Ayaa ka qeybgalay madalada wadatashiyada beesha



**292 kirayste**

Ayaa ka-qeybgalay madalada fikradaha beesha

# Habka Howlgelinta Kiraystaha

Heer dhisme ama townhouse yaa ku jira?

1. Wakiilo beeled 250 kii reerba labo wakiil ayeey dooranayaan kiraystayaasha.

2. Guddiyada dhismaha ama townhouses

Waa mid u furan dhamaan kiraystayaasha

Heer Magaalo

Kiraystayaasha waxaa lagu soo xulaa habraac codsi si aay u galaan Guddiga La-socoshada Xukunka Kirayste-Shaqaale ee Magaalada oo dhan ah.

1. Heer dhisme ama townhouse



2. Heer beel ama OU

Kiraystayaasha dhisme ama townhouse ayaa la doortaa ama la xushaa si aay ugu mataalaan beeshooda Miiska Waxqabadka Beesha.



**Wax-ka-qabashada muhimadaha kiraystaha si loo dhiso beelo nolol leh**



# Siduu u shaqeeyaa Habka Howlgelinta Kiraystaha?

**Qaabdhismeedka Habka Howlgelinta Kiraystaha ee la-cusbooneysiiyey sida uu u shaqeeyo waxaa ku jira saddex heer.**

## Heer Dhisme ama townhouse




**Heerka dhismaha ama townhouse** wuxuu ka kooban yahay kooxo kala duwan oo ah kiraystayaal ka kala socda beelo dhismayaal ama townhouse gaar ah. Waxaa ka jira afar ikhtiyaar oo howlgelin ah heer dhisme: wakiilo beeleet, guddiyo dhismo iyo townhouse, xiriiro kirayste iyo wakiil la'aan.

Kiraystayaasha heer dhismo ama townhouse waxay dusha kala socon doonaan qorshaha waxqabadka beeshooda sida uu shaqeynayo. Qorshaha waxqabadka beesha wuxuu jawaab u yahay muhimadaha kiraystayaasha tilmaameen waxaana ku jira howlaha iyo xalalka wax looga qabanayo baahiyaha iyo muhimadaha degaanka. Kiraystayaasha ayaa dooranaya ikhtiyaarka howlgelinta degaanka aay doorbidayaan.

**Waa kuwan ikhtiyaarada howlgelinta:**  
**Wakiilo Beeleet**

## **Wakiilo Beeleed** (oo loo yaqaanay Wakiilo Kirayste)

Waxaa soo doorta kiraystayaasha ka socda beel dhisme ama townhouse gaar ah. Waxay dooran karaan laba wak 250 kii reerba. Dhamaan wakiilada la soo doorto waxay ka matalaan beeshooda Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha. Kiraystayaasha oo dhan weey isu soo sharixi karaan jagada Wakiilka Beesha.



# Guddiga dhisme ama townhouse



**Guddi dhisme ama townhouse** wuxuu u furan yahay dhamaan kiraystayaasha ka socda beel dhisme ama townhouse gaar ah. Guddi dhisme ama townhouse walba wuxuu dooran doonaa laba xubnood si aay ugu matalaan beeshooda Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha.



## Xiriir kirayste

**Xiriirada Kiraystaha** waa kooxo kirayste madax-banaan oo xubno ku saleysan. Weey ka madax-banaan yihiin Toronto Community Housing kumana laha wakiil Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha.



Beesha weey dooran kartaa in aay lahaato xiriir kirayste iyadoo aay u dheer tahay in aay ku howlanaadaan Habka Howlgelinta Kiraystaha ee lacusbooneysiyyey.

## Wakiil la'aan

Beesha doorata ikhtiyaar ah **wakiil la'aan** kuma lahaan doonto wakiil beeled Habka Howlgelingta Kiraystaha. Heerkaas ma jiri doonto qaab howlgelin oo lagula soconayo guusha qorshaha waxqabad ee beeshooda.



## Heer Beel ama Unug Howlfulin



Kiraystayaal ka socda dhisme iyo townhouse walba ayaa loo doortaa ama xushaa si aay ugu matalaan beeshooda **Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha** (oo loo yaqaanay Golayaasha Kiraystaha). Xubnaha Miisaska Waxqabadka Beesha Kiraystaha waxay la shaqeyn doonaan kiraystayaasha, shaqaalaha iyo

lamaanayaasha si aay wax uga qabtaan muhimadaha  
kiraystayaasha tilmaameen ee qeyb ka ah mid walba oo ka mid ah  
Miisaska Waxqabadka Beesha Kiraystaha.



# Heer Magaalo

Kiraystayaal iyo shaqaale ayuu ka koobnaan doonaa **Guddiga La-socoshada Xukunka ee Shaqaale-Kirayste ee Magaalada oo dhan ah.** Guddiga wuxuu ahaan doonaa qaab-dhismeed loogu talogalay kiraystayaasha iyo shaqaalaha ka-qeybgalay Habka Howlgelinta Kiraystaha in aay wax ka helaan laguluna xisaabtamo. Xubnaha waxaa lagu soo xushaa habraac codsi go'aanada kama dambeysta ahna ee xulidda xubnaha waxaa gaari doona guddi kiraystayaal iyo shaqaale ah.

## Maxaa soo socda

Talaabooyinka ku xiga ee hirgelinta Habka

Howlgelinta Kiraystaha la-cusbooneysiiyey:

- in beelaha aay u codeeyaan ikhtiyaarkooda howlgelinta degaanka
- in la sameeyo guddiyo loogu talogalay beelaha u codeeyey ikhtiyaarka guddiga dhismaha/townhouse
- in loo qabto doorashooyin kirayste beelaha u codeeyey ikhtiyaarka Wakiil Beeleed
- in la sameeyo Miisas Waxqabad Beel Kirayste
- in la sameeyo Guddi La-socosho Xukun ee Shaqaale-Kirayste oo Magaalada oo dhan ah iyadoo la marayo habraac codsi
- in la siiyo tababar iyo fursado loogu talogalay kiraystayaasha ka-qeybgalaya Hab Howlgelin Kirayste








# Waxa aad u baahan tahay in aad ka ogaato ikhtiyaaraadaada howlgelinta degaanka



Kiraystayaasha waxay heli doonaan fursad aay ugu codeeyaan ikhtiyaarka aay doortaan ee howlgelinta degaanka. Ma garaneysid ikhtiyaarka aad dooraneysid? Waa tan shax kaa caawineyso in aad go'aan gaarto.


Shuruudda	Ikhtiyaar	Ikhtiyaar
	<b>Wakiil Beeleed</b> 	<b>Guddi Dhisme/townhouse</b> 
 <b>Habraaca xulashada</b>	<p>Kiraystayaashaa doorta Dhamaan kiraystayaasha beesha aay khuseyso waxay heli doonaan fursad aay isku sharaxaan kuna codeeyaan.</p>	<p>U furan dhamaan kiraystayaasha</p> <p>Tirada ugu yar ee kiraystayaal ah ayaa loo baahan yahay si guddi loo sameeyo.</p>
 	<p>Laba wakiil beeleed ayaa loo dooranaya 250 kii reerba. Wakiilada la doorto waxay fariisan doonaan Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha</p>	<p>Waxaa jiri doona baaq furan oo loogu yeerayo kiraystayaasha in aay ku soo biiraan.</p> <p>Guddi walba wuxuu xulayaa laba kirayste si aay u fariistaan Miiska Waxqabadka Beesha Kiraystaha</p>
 <b>Xaq-u-lahaanshaha</b>	<p>Kirayste walba oo 16 jir ah ama ka weyn kulana jira heshiis kiro TCHC</p>	

**Lacag-siinta**

Dhamaan kiraystayaasha waxay soo gudbin  
karaan codsiyo ilo dhaqaale si wax looga  
qabto muhimadaha beeshooda




# Waxa aad u baahan tahay in aad ka ogaaato ikhtiyaaraadaada howlgelinta degaanka

Shuruudda	Ikhtiyaar	Ikhtiyaar
	<b>Wakiil Beeleed</b> 	<b>Guddi</b> <b>Dhisme/townhouse</b> 
<b>Shaqada</b>	Ilaalinta iyo fulinta qorshaha waxqabad ee beeshooda	
<b>La-xisaabtanka shaqaalah</b>	Shaqaalah TCHC ayaa mas'uul ka ah taageerada iyo dhisidda howlgelinta kiraystaha beeshooda gudaheeda	
<b>La-xisaabtanka Kiraystaha</b>	Kiraystayaasha waa in aay raacaan shuruudaha soo-xigashada, ee waafaqsan mabaadi'da iyo caqiidooyinka Axdiga Kiraystaha iyo Habka Howlgelinta Kiraystaha. Waxaa ku jira shuruudaha u-fududeynta curyaamiinta ee Xeerka Helitaanka Ontaariyaanka Curyaanimada leh iyo iyo Xeerka Xuquuqul Insaanka, Khashkhashaadda iyo Nadaamka Helitaan Cadaalad leh ee TCHC.	



# Waxa aad u baahan tahay in aad ka ogaato ikhtiyaaraadaada howlgelinta degaanka



Shuruudda	Ikhtiyaar	Ikhtiyaar
	<b>Xiriir Kirayste</b> 	<b>Wakiil La'aan</b> 
	Waxaa go'aamiya xiriirka kiraystaha	Ma khuseyso, wakiil ma jiro
<b>Xubinimada</b> 	Waxaa go'aamiya xiriirka kiraystaha	Xubinimo ma jирто
	Waxaa go'aamiya xiriirka kiraystaha	Xaq-u-lahaansho ma jирто
	Dhamaan kiraystayaasha waxay soo gudbin karaan codsiyo ilo dhaqaale si wax looga qabto muhimadaha beeshooda	



# Waxa aad u baahan tahay in aad ka ogato ikhtiyaaraadaada howlgelinta degaanka

Shuruudda	Ikhtiyaar	Ikhtiyaar
	<b>Xiriir Kirayste</b> 	<b>Wakiil La'aan</b> 
<b>Shaqada</b>	Ma aha qeyb ka mid ah Habka Howlgelinta Kiraystaha	Ma aha qeyb ka mid ah Habka Howlgelinta Kiraystaha
<b>La-xisaabtanka shaqaalaha</b>	Xiriirka Kiraystaha waa madax-banaan yahay	Beesha waa madax-banaan tahay
<b>La-xisaabtanka Kiraystaha</b>	Xiriirka kiraystaha ayaa go'aaminaya	Beesha ayaa go'aamineysa

# Dulmarka habraaca codeynta




## Ole-olaha wacyigelinta

Talaabada	Tilmaanta
	<b>Talaabada koowaad:</b> La-socodsii kiraystayaasha wax ku saabsan habraaca codeynta iyo ikhtiyaarada kala duwan ee howlgelinta degaanka.
	<b>Talaabada labaad:</b> Wacyigelin samee si aad u dhiirigeliso kiraystayaasha in aay codeeyaan iyo in loo sheego goorta codeynta aay dhici doonto.

## Maalinta codeynta

Talaabada	Tilamaanta
	<b>Talaabada saddexaad:</b> Shaqaalaha waxay xaqiijinayaan in kiraystaha uu ku qoran yahay heshiiska kirada reerka.
	<b>Talaabada afaraad:</b> Kiraystaha wuxuu saxiixayaan in uu fiirsaday fiidyowga ikhtiyaarada Howlgelinta Degaanka. Kiraystayaasha waxay daawan karaan fiidyowga waqt hore ama maalinta codeynta.
	<b>Talaabada shanaad:</b> Kiraystaha wuxuu helayaa warqadda codeynta wuxuuna u codeynayaan hal ikhtyaar isagoo daaha codeynta gadaal ka maraya. Warqadda codeynta ee la calaamadeeyey waxaa la gelinayaan sanduuqa.
	<b>Talaabada lixaad:</b> Ugu dambeyntii dhamaadka dhacdada codeynta, laba kirayste ayaa meel dadweynaha u furan

ugu tirinaya codadka si mutadawacnimo waxayna saxiixayaan natijada.



**Talaabada toddobaad:** Natijada waa la qorayaa waxaana lagu dhejinayaan beesha dhexdeeda iyadoo la isticmaalayo isgaarsiino dhinacyo badan.



# S&J ah doorashada ikhtiyaarkaaga howlgelinta degaanka



## Maxaan u codeynayaa?

Kiraystayaasha waxay u codeyn doonaan ikhtiyaarka howlgelinta heer dhisme ama townhouse. Waxaa jira afar ikhtiyaar:

- Wakiilo Beeleed
- Guddi dhisme/townhouse
- Xiriir kirayste
- Wakiil la'aan

## Beesha ma yeelan kartaa xiriir kirayste?

Xiriirada kiraystaha weey ka madax-banaan yihiin Toronto Community Housing.

Beesha weey sameysan kartaa xiriir kirayste waqt walba.

Xiriirada kiraystaha waa jiri karaan ama waa la sameyn karaa Habka Howlgelinta Kiraystaha ee la-cusbooneysiyyey oo jira.



## Yaa codeyn kara?

Kirayste walba ee Toronto Community Housing oo 16 jir ah ama ka weyn ah oo ku qoran heshiiska kirada.

## Goormaan codeynayaa?

Codeynta waxay bilaaban doontaa deyrta 2019.

Kiraystayaasha waxay heli doonaan ugu yaraan ogeysiis laba toddobaad ah. Taariikhaha codeynta beelaha weey kala duwanaan doonaan.

## Maxaa dhacaya markaan codeeyo?

Shaqaale Toronto Community Housing ayaa sameyn doona

wacyigelin iyagoo isticmaalaya isgaarsiino dhinacyo badan ah si kor loogu qaado wacyiga dadka ee ah sida codeynta aay u dhaceysyo iyo tilmaamaha ikhtiyaarada kala duwan ee howlgelineed. Si aay u daawadaan fiidhyowga kiraystayaasha waxay tagi karaan **torontohousing.ca/TER** .



## Ma dooneysaa inaad ku howlanaato beeshaada? Waa wax aad u fiican! Waan ku caawini karnaa.

Waxaa naga go'an in ku howlanaanta aay sii socoto waqtiga aan fulineyno Habka Howlgelinta Kiraystaha la-cusbooneysiiey. Inta aan hore u socono, waxaa jira fursado aad gacan ka geysan karto:

Waa kuwan siyaabo aad ugu howlanaan karto:

- Ka caawi beeshaada in aay dhameystiraan qorshaha waxqabadk beesha
- Tilmaan sheeyada aan-raasumaalka ahayn ee hagaajin Kara beeshaada iyadoo la marayo barnaamijka Miisaaniyadda ka qeybgalka leh
- Dalbo Lacagaha Waxqabadka Kiraystaha (oo loo yaqaanay Lacagaha Golaha Kiraystaha) si aad lacag ugu hesho mashruuc ama dadaal wax-ka-qaban doono muhimadahaaga beesha
- Ka-qeybgal dhacdooyinka iyo dadaalada degaanka

La hadal Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha (CSC) ee howlgelinta si uu kaaga caawiyo in uu kugu xiro ilaha aad raadineyso. Ma hubtid qofka ah CSC-gaaga? Ka wac Xarunteena Daryeelka Macaamiisha **416-981-5500** waxay kaa caawini doonaan in aad hesho qofka saxda ah.

Shaqaalaha howlgelinta iyagana waxaa loo tababaray in aay hubiyaan TCHC in aay taageerto baahiyahaaga.



# → Qofka lala xiriirayo

**Xubnaha kooxda Toronto Community Housing waxay u joogaan in aay ku taageeraan. Si aad u ogaato cidda aad la xiriiri karto waa kan liiska dadka aad la xiriiri karto.**

**Isku-duwahaaga Adeegyada Beesha wuxuu ku siin karaa war dheeraad ah haddii aad:**

- u baahan tahay taageero ah bilaabidda mashaariic beeleet
- u baahan tahay taageero ah sameynta xayeyisiino isgaarsiineed
- dooneyso in aad qabsato meel lagu shiro
- dooneyso xog ku saabsan adeegyada iyo ilaha ku hareereysan beeshaada iyo Toronto Community Housing

**Ma dooneysaa wixii ugu dambeeyey Habka Howlgelinta Kiraystaha? La soo xiriir taleefankeena gaarka ah ee Howlgelinta Kiraystaha.**



**EngagementRefresh@torontohousing.ca**



**416-981-4435**

**Nagala soo xiriir!**



**torontohousing.ca/TER**



**@TOhousing**



**@TorontoCommunityHousing**



**@torontohousing**



**@TorontoCommunityHousing**

**#YourCommunityYourSay**



Copyright© 2019 Toronto Community Housing